



Caawimaada Cuntada Aasaasiga ah iyo barnaamijyada tababarka iyo shaqaalaynta ee la xiriirta

Xaq-u-yeelashada Caawimaadda Cuntada Aasaasiga ah waa mid ku salaysan dakhligaaga bilaha ah (canshuurta ka hor) iyo tirada dadka reerkaaga ka tirsan. Sidoo kale waxaan firinnaa kharashaadkaaga, sida kirada iyo daryeelka ilmaha, si loo xadido waxa ay noqonayaan dheefahaaga. Waxaad bartan internetka ka oggaan kartaa oo aad ka codsan kartaa dheefaha www.washingtonconnection.org.

Haddii aad qaadato Caawimaadda Cuntada Aasaasiga ah, waxaad xaq u yeelan kartaa in aad hesho adeegyada iyada oo loo marayo barnaamijka Tababarka iyo Shaqaalaynta Cuntada Aasaasiga ah (BFET), kaas oo bixiya waxqabadyadan soo socda:

- Shaqo Raadinta La Kormeero
- Tababarka Shaqo Raadinta
- Waxbarashada Xirfaadeed
- Tababarka Xirfadaha Nolosha
- Waxbarashada Aasaasiga ah
- Adeegyada Shaqo Ku-negaanshaha

BFET ayaa waxaa bixiya ururrada bulshada ku saleysan iyo bulshada degaanka iyo kuleejyada farsamada ee guud ahaan Gobolka Washington. Haddii aad rabto maclumaaad dheeraad ah oo ku saabsan xaq-u-yeelashada, waxqabadyada, iyo sida la isu qoro, waxaad booqan kartaa www.dshs.wa.gov/bfet.

Daynta Canshuurta Dakhliga La kasbaday

Deynta Canshuurta Dakhliga La kasbaday, (ETC) wuxuu dheef siiyaa qoysaska haysta dakhli shaqo yar. Waxaa dhici karta in aad u qalantid xitaa haddii aan laguug luuqashayn wax canshuur ah. Waa in aad xareysaa canshuur celin una qalantaa in aad qaadatid deynta Canshuurta Dakhliga La kasbaday (ETC).

Booqo www.irs.gov/credits-deductions/individuals/earned-income-tax-credit si aad u hesho maclumaaad dheeraad ah.



Ka wareegidda TANF



Transforming lives

DSHS 22-1586 SM (10/20) Somali



Diyaar ma u tahay inaad kawareegdid TANF ama WorkFirst?

Midkaan wuxuu noqon karaa waqtii aad u xiiso baddan. Inbaddan oo kamid ah barnaamijyada taageerada iyo adeegaha waa kuwo laga helo bulshadaada ama jaaliyadaada si ay kuugu caawiyaan wareegidaada. Waxaa kamid ah:

- Adeego bilaash ah oo loogu talogalay dadka karaadinaya-shaqa tooska WorkSource ee ah meesha Waaxda Dammaanada Shaqaalaynta
- Caawimaada cuntada iyo shaqaalaynta la xiriirta iyo tababarka dheefaha ee tooska Waaxda Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka
- Daryeelka caafimaadka
- Taageerada ilmaha
- Deynta Canshuurta Dakhliga Lakasbaday

Adeegaha loogu talogalay dadka raadiya-shaqa

Boggan internetka www.worksourcewa.com, waxaad ka heli kartaa:

- Shaqooyin furan
- Xeelado loogu talogalay helida shaqa
- Caawimaada raadinta shaqa, ay ka mid tahay qorida-taariikhdaada wax qabad iyo xirfado iyo in laguugu caawiyo u diyaar garoowga wareysiga
- Meel la geliyo taariikhdaada wax qabad iyo xirfado si ay u arkaan dadka loo shaqeeyo
- Qiimeyn xirfado
- Wareejino laguu wareejiyo barnaamijyo tababar
- Waa halkee meesha shaqaalaynta ugu baddan ee aadka loo dalbado dadka shaqeeya
- Meesha Xarunta WorkSource kutaala degmadaada, ee leh helid kombuyuutar lagu geli karo Internet, Teleefono, qalab waraaqaha lagu koobiyo, iwm

Kheyraadka Bulshada

Shabakada Macluumaadka Washington, lagu galo ayada oo lagaraaco 211, waxaa laga helaa macluumaad baddan oo gobolka oo dhan ah oo kusaabsan xogaga bulshada. Waxaad ka heli kartaa macluumaad baddan boggaan internetka: <http://win211.org/>

Xiriirka Washington waa xog kale oo aad u wanaagsan. Waxay ku siinaysaa qaab aad ku heshid kuna codsatid adeegyo badan oo kala duwan iyo caawimaad tooska internetka ah. Waxaad ka heli kartaa macluumaad badan boggaan internetka: <https://www.washingtonconnection.org/home/>

Caawimaada Qoyska

TAAGEERADA ILMAHA

Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka' Qaybta Taakulaynta Ilmaha waxay ka go'an in ay bixiso adeegyo waxtar leh oo lagu caawiyo qoysaska si looga fogeeyo saboolnimada. Waxay ku caawin karaan:

- Meel ku sheegidda waalidiinta aan-ilmaha hayn
- Sameynta, wax-ka-beddelka (beddelidda), la-socoshada iyo dhaqangelinta amarrada taageerada carruurta
- Caddeyntha waalidnimada

Waxaad ula xiriiri kartaa Qaybta adiga oo waca lambarkaan 1-800-442-5437 ama gala boggeeda internetka, <https://www.dshs.wa.gov/esa/division-child-support>

KHEYRAADKA WAALIDNIMADA

Waxaad ka heli kartaa ParentHelp boggeeda internetka, ParentHelp123.org ama adiga oo wacaya lambarkan 1-800-322-2588. Waxaa ka buuxa kheyraad faa'iido leh-waxkasta oo ku saabsan horumarinta ilmaha illaa caawimaad iyo tallo caafimaad.

DARYEELKA ILMAHA

Tooska Xiriirada Shaqaynta Daryeelka Ilmaha, waxaad u qalmi kartaa caawimaada daryeelka ilmaha marka aad shaqaynaysid, ama xaaladaha qaarkooda in aad iskuulka aadid. Waxaad haysataa noocyoo kala duwan oo daryeel bixiyayaal ilmaha ah si aad uga dooratid midka aad dooneyso.

Waxaad ka codsan kartaa dheefaha boggan internetka www.washingtonconnection.org ama adiga oo wacaya 1-844-626-8687.

Wixii ku saabsan caawimaadda helida daryeel bixiye ilmaha oo rukhsad haysta, kala xiriir Oggaanshaha Daryeelka Ilmaha Washington lambarkan 1-800-446-1114 ama www.childcare.org.

DARYEELKA CAAFIMAADKA

Haddii aadan hayasan caymiska daryeel caafimaad, waxaad codsan kartaa adiga oo u maraya Washington Healthplanfinder adiga oo:

- Wacaya 1-855-923-4633
- Uga buuxiya foomka codsiga si toos bogga internet-ka www.wahealthplanfinder.org
- Keenaya foomka codsiga oo buuxa xafiiska adeegga bulshada ee Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) ee degaanka

